Somaliska

REGION JÄMTLAND HÄRJEDALEN

Ku soo-dhowoow Gobolka Jämtland Härjedalen!

Warbixin loogu talagalay qofka adigoo kale ah, oo dhowaan dalka Iswiidan yimi u soo guuray gobolka Jämtland ama Härjedalen iyo u baahan in u xiriir la yeesho xarumaha daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka ama xarumaha daryeel-caafimaadeedka ilkaha.

www.regionjh.se
063-14 75 00

Markii magangelyo-doone ama qof dhowaan dalka yimi ahaan, aad halkaan timaado waxaa lagu siinayaa fursadda baaritaanka xaalad-caafimaadeedka oo lacag la'aan ah

Baaritaanka xaalad-caafimaadeedka waxaa lagu dhaqaaqa sida ugu dhaqsida badan, kaddib markii aad dalka Iswiidan timaado. Haddii aadan sharciga haysan ama is-qarin jirtay, waxaad xaq ku leedahay baaritaanka xaalad-caafimaadeedka oo lacag la'aan ah. Markii baaritaanka xaalad-caafimaadeedka la sameeynayo waxaad la kulmi doonta qof takhtar ama kalkaalisada caafimaadka.

Waxaad ka sheekayn karta caafimaadkaaga, kaddib waxaa laga qaadi doonaa shaybaar taasoo ujeedadeeda tahay in la hubsado in jirkaada aadan ku sidin cudurrada lays qaadsiiyo oo halista ah. **Sababta baritaanka xaalad-caafimaadeedka loogu dhaqaaqayo waxaa weeyaan, in lagu siiyo daryeelka iyo daawaynta aad u baahan tahay.** Waxaa kaloo lagu siin doonaa **warbixin ku saabsan hab-shaqaynta xarumaha daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka.** Baaritaanka xaalad-caafimaadeedka waxaa hirgeliya [**Enhet för Asyl och flyktinghälsa**].

Fursadda baaritaanka waxaa lagugu wargelin doonaa warqad boostada lagugu soo diro, taasoo ay ku qoran tahay ballanka baaritaanka xaalad-caafimaadeedka. Waxaad kaloo wici karta **06314 23 60 00** aad laf-ahaantaada ballanta qabsan karta. Waa haddii fursadda aan lagu siin ama weli la sameeyn baaritaanka xaalad-caafimaadeedka.

Xaqa u leedahay daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka iyo daryeel-caafimaadeedka ilkaha

Magangelyo-dooneyaasha waawayn, da'dooda ka wayn 18 sano, waxay xaq u leeyihiin in ay helaan daryeel-caafimaadeedka caadiga iyo kan ilkaha oo degdeg ah, daryeel-caafimaadeedka hooyooyinka, daryeel-caafimaadeedka ummulida, talo-siin xiriir la leh waxyaalaha uur-qaadida laysaga ilaaliyo, Ilmo iska soo ridida, daryeel-caafimaadeedka waafaqsan Xeerka ka hortagga faafinta cudurrada [smittskyddslagen], iyo daryeel-caafimaadeedka qof takhtar ku qiimeeyo in daryeelku u ka hortegi karo xaalad caafimaadeed halis ah. Qiimaha daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka waxaa loo bixiya hab waafaqsan liis u gaar ah, laakin ka yar kuwa bukaan-socodyada caadi ahaan ay bixiyaan.

Magangelyo-doone ilmaha ah iyo dhallinyarada aan weli 18 sano buuxsan, waxay xaq u leeyihiin in ay helaan daryeel-caafimaadeedka caadiga iyo kan ilkaha oo lacag la'aan ah, isla sida ilmaha dalka Iswiidan ku nool oo kale.

Haddii lagu siiyay **ruqsadda degenaanshada** [**uppehållstillstånd**] waxaad xaq u leedahay daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka iyo daryeel-caafimaadeedka ilkaha isla sida shuruuda muwaatinyiinta dalka Iswiidan ku nool oo kale. Daryeel-caafimaadeedka waxaa loo hela hadba baahida daryeel-caafimaadeedka jirta, iyo dadka degmooyinka lagu meelayay. Waxaana la bixiyaa kharash caadiga ah. Kuwa weli ku nool hoyga Hey'adda Socdaalka, waxay bixinayaan kharashka magangelyo-dooneyaasha, waa haddii ay haystaan kaarka loo yaqaanno [lma-kort]. Ilmaha aan weli 18 sano buuxsan waxaa la siiyaa daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka oo lacag la'aan ah. Ilmaha aan 21 sano buuxsan lacag la'aan ayaa daryeel-caafimaadeedka ilkaha lagu siiyaa. Da'daas kaddib waxay bixinayaan kharashyada daryeel-caafimaadeedka ilkaha ee hirgalay.

Haddii qofku usan ka faa'iidaysan karin ballan xarumaha daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka ama daryeel-caafimaadeedka ilkaha looga qabtay waa in daahid la'aan u ballankaas ciribtira, wargelin la'aanta waxay ku qasbi doonta in uu bixiyo kharashka ka baaqashada.

Haddii aad u baahan qof turjubaan ah

Waxaad mar kasta xaq u leedahay turjubaan markii aad la xiriirayso xarumaha daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka iyo xarumaha daryeel-caafimaadeedka ilkaha. Maadaama dartaada turjubaan loo ballamiyay waxaa aad muhim u ah inaad ka soo habsaamin ballamada lagaga qabtay rugta daryeel-caafimaadeedka, isbitaalka ama xarumaha daryeel-caafimaadeedka ilkaha.

Xajinta sirta xirfadda

Shaqaalaha xaruumaha daryeel-caafimaadeedka iyo turjubaanada waxay tixgeliyaan sirta xirfada. Taasoo macneheeda ah, in haddii aadan raali ka ahayn aynan qof kale ama hay'ad kale u gudbin karin warbixin-shaqsiyeed adiga kugu saabsan.

Markii aad u baahan tahay daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka, daryeel-caafimaadeedka ilkaha ama daawo qof takhtar ah ku qoray aad iibsanayso

Haddii ay suurtagal tahay, waa inaad mar kasta haysato kaarka aqoonsiga, kaarka aqoonsiga Hay'adda canshuuraha [skatteverket], caddaynta aad magangelyada ku codsatay, kaarka loo yaqaanno [lma-kort] ama baasaboor oo aad aqoonsigaaga ku xaqiijinayso.

Haddii Tobbanka lambar aqoonsiga ee dalka Iswiidan [personnummer] aadan haysan, waxaa marka ugu horeeyso oo aad daryeel-caafimaadeedka Gobolka Jämtland Härjedalen, ugu baahato lagu siinayaa mid kumeelgaar ah. Waa in lambaradaas aad keydsata, waxay wax ku tarayaan marka ku xigta ee daryeel-caafimaadeed u baahato. Haddii lambarrada ay ka lummaan waa inaad sheegta magacaaga iyo taariikhda aad dhalatay.

Socdaalada lagu tago xarumaha daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka

Socdaalada lagu tago xarumaha daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka iyo xarumaha daryeel-caafimaadeedka ilkaha adiga ayaa ka mas'uul ah. Socdaalada xarumaha daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka awgood waa inaad isticmaasha bas, tareen ama baabuurkaaga. Goor dambe ayaa lagu gudaya kharashka socdaalka. Waa inaad keydsata caddaymaha aad lacagaha ku bixisay. Tan kale, goobaha aad booqatay waydiiso in ay ku siiyaan foomka loo yaqaanno [sjukreseblankett].

Warbixin dheeraad ku saabsan kharashyada socdaalada ka aqriso: http://ltr.se/fardtjanst-sjukresor/sjukresor/

Haddii xaalad-caafimaadeed darteed aad tegi karin xarumaha daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka, waxaa xaaladaha qaarkood xaq ku leedahay inaad taxi ku tagto. **Qiimaynta xaaladda waxaa ku dhaqaaqo shaqaalaha daryeel-caafimaadeedka. Iyaga ayaa iskaleh go'aan socdaalka taxiga ee xarumaha lagu tago.** Sidaasoo kale, haddii shaqaalaha xaaladaada ay ku qiimeeyaan inaad u baahan tahay wehelka qaraabadaada, ayay kugu wehlin karaan taxi oo keliya. Wadeha taxi waa in lacagtiisa la siiya socdaalka kahor.

Sidaasoo kale socdaalka guri ku noqoshada adiga ayaa ka mas'uul ah isticmaal bas, tareen ama baabuurkaaga, waa haddii shaqaalaha daryeel-caafimaadeedka aynan wax kale kula talinin. Waa sidaas arrinta haddii xitaa daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka taxi ama ambalans.

Haddii aad u baahan talo ku saabsan daryeel-caafimaadeedka iyo bukaaanka

Haddii aad garacdo **lambarkaan 1177** waxaa kula hadli doona qof kalkaalisada caafimaadka ah. Kalkaalisada caafimaadkan waxay ka jaawaabi doontaa su'aalahaaga, ku siin doonta talo, qiimayn doontaa haddii aad u baahan daryeel-caafimaadeedka iyo goobaha aad kala xiriiri lahayd.
Khadka 1177 waxaad wici karta saacad kasta iyo habeen iyo maalin.

Haddii aad doonayso inaad iskaaga u aqrisato warbixin ku saabsan daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka

Bogga internetka **www.1177.se** waxaad ka aqrisan karta warbixin ku saabsan cudurrada, dhibaatooyinka caafimaadeeed, baaritaanada iyo daawaynta. Warbixinta badidooda waxaa lagu turjumaya luqado tiro badan oo kala duwan.

Xannuun degdeg ama xaalad kale caafimaadeed miyaa la dhiban tahay?

Haddii aad la dhibanayn xaalad-caafimaadeed oo degdeg ah, waxaad arrinta kala xiriiri karta rugta daryeel-caafimaadeedka. Rugta caafimaadeed waxay furan tahay isniin-jimce saacadaha 08.00 - 17.00. Qofkii rabo in uu qof takhtar ama kalkaalisada caafimaadka ah, in uu kula kulmo waa in uu kahor ballan qabsada. Xarumaha qaarkood ballan la'aan ayaa dhawr saacadood toddobaadkii la booqan kara.

Faahfaahinta xiriirka rugta daryeel-caafimaadeedka /Daryeel-caafimaadeedka ilkaha ee dadwaynaha ee aad ka tirsan tahay waa:

Haddii aad u xannuunsato ama u dhaawac ku gaaro

Haddii hab lamafilaan ah aad u xannuunsato ama u dhaawac ku gaaro, waxaad booqan karta waaxda daryeel-caafimaadeedka degdegga ee isbitaalka [Östersunds sjukhus] Waaxda xilli kasta iyo maalin kasta ayaa la booqan kara.

Lambarka markii xaalad degdeg ah ay jirto ee la garaaco waa: 112.

112 waa lambarka gurmadka waxaana la adeegsan kara oo keliya, haddii ay jirto xaalad nafta halis u ah.

Haddii aad magangelyo-doone tahay, oo isbitaalka [Östersunds sjukhus] lagu seexiyo, waxaa muhim ah inaad adiga ama shaqaalaha ay wargeliyaan Hey'adda Socdaalka [Migrationsverket – Östersund]. Tal. Hey'adda Socdaalka waa 010-485 54 18.

Haddii aad caafimaadka ilkaha la dhiban tahay

Haddii aad u baahan daryeel-caafimaadeedka ilkaha oo degdegga (ku hayso qandho, ku soo bararaan ilkaha, xannuun ama afka jug ka gaartay), waa inaad khadka taleefanka kula xiriirta Heeganka daryeel-caafimaadeedka ilkaha ee dadwaynaha [Folktandvården] lambarka heeganka waa 063-15 33 00. Qofkii rabo in uu qof takhtar ama kalkaalisada caafimaadka ilkaha waa in uu ballan qabsada.

Haddii aad u baahan inaad qof la hadasho

Haddii ay jirto dhibaato xiriir la leh caafimaadka nafsiga oo aan culusayn, waxaad kala xiriiri karta rugta daryeel-caafimaadeedka ama waaxda daryeel-caafimaadeedka loogu talagalay magangelyo-dooneyaasha. Dhibaatada waxay noqon karta mid hurdada xiriir la leh, qoomamayn ama falcelinta murugta iyo geerida.

Haddii caafimaadkaaga nafsiga uu aad u darran yahay, oo aad u baahan tahay caawinaad degdeg ah waxaad la xiriiri karta waaxda caafimaadka nafsiga degdegga ee isbitaalka [Östersunds sjukhus]. Lam. taleefanka waa: 063-15 32 50

Waxaad mar kasta wici karta 1177 oo caawinaad darteed la xiriiri karto.

Haddii aad uur leedahay ama aad yeelan doonto

Shayga lagu hubsado uur-qaadida waxaa laga iibsada farmashiyada iyo dukaaman tiro badan. La xiriir rugta daryeel-caafimaadeedka aad ka tirsan tahay haddii aad uur yeelato. Xarunta daryeel-caafimaadeedka waxaa ku yaallo rugta daryeel-caafimaadeedka hooyooyinka/ummulisada. Waxaad xaq ku leedahay in hab joogto ah u qof ummuliso ah ku kormeero. Qof takhtar ah ayaa xiriir loola yeelanaya haddii loo baahdo. Ummulida kahor warbixin ayaa lagu siinayaa. Sidaasoo kale xilliga ummulida iyo kormeerida xaalad caafimaadeedkaaga iyo kan dhallanka ba. Waxaad kaloo lagu siin doona talo ku saabsan siyaabaha uur-qaadida looga hortago. Daryeel-caafimaadeedka noocan ah waa lacag la'aan.

Ilmo iska soo ridid

Qofka dumarka ayaa xaq u leh g'aanka ilmo iska soo ridida, taasoo waafaqsan sharciga dalka Iswiidan. Waxaad arrinta kala xiriiri karta rugta daryeel-caafimaadeedka. Waxaad caawinaad waydisan karta oo aad wici karta 1177.

Dumarka ku talo jiro in ilmaha ay iska soo ridaan, waxay ballan ka qabsan karaan waaxda Ilmo iska soo rididda ee ku taallo isbitaalka [Östersunds sjukhus]. Ballanka waxaa laga qabsada la taliyeha ka hawlgala Waaxda haweenka [Kvinnokliniken], kala xiriir 063-15 39 30 ama 063-15 35 93.

Rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta [Barnavårdscentralen]

Rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta [BVC], waxaa loogu talagalay ilmaha da'dooda u dhaxayso 0 – 5 sano. Baaritaano iyo tallaal dartooda ayaa hab joogto ah rugta ballan looga qabta. Tan kale, hab joogto ah ayaa horumarka iyo caafimaadka loo kormeera. Waalidiinta waxaa la siiyaa taageero iyo talo. Adeegga rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta waa lacag la'aan. Booqashada-na waa ikhtiyaari. Dhammaan ilmaha rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta booqda, waxaa ballan loo qabta hab joogto ah iyo hab waafaqsan da'dooda. Waalidka su'aal ka qabo xaalad-caafimaadeedka ilmahiisa ama waalidnimada wuxuu toos ula xiriiiri karaa rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta.

Daawooyinka

Daawada qof magangelyo-doone ah u qof takhtar ah qoro, waxaa qiimo jaban laga iibsan kara farmashiyada. Laakiin kuwa ruqsad la'aanta lagu iibsado waxaa lagu iibsada qiimo aan jabnayn. Qofku waa in uu lacagtaas iska bixiyaa.

Xaddaynta heerka kharashka [Högkostnadsskydd]

Qofka sharciga haysto, wuxuu ka faa'iidaysan karaa nidaamka loo yaqaanno xaddaynta heerka kharashka [högkostnadsskydd]. Waa kharashyada xiriirka la leh socdaalada bukaanka, kuwa daryeel-caafimaadeedka iyo kuwa daawooyinka.

Magangelyo-dooneyaasha waxay Hey'adda Socdaalka [Migrationsverket] ka codsan karaan kaalmo-dha-qaaleedka, oo ay isaga bixiyaan kharashyada qaarkood. Sidaas awgeed, waa in qofku u keydsado dhammaan caddaymaha u lacagaha ku bixiyay, sida kuwa daryeel-caafimaadeedka caadiga ah kuwa ilkaha, kuwa uu ku iibsadaay daawo u rugqsad ku soo qaatay iyo kharashyadaa socdaalada bukaanka. Warbixin dheeraad waxaad lagala xiriiri karaa [Migrationsverket].